Go’aammo iyo xeerar

Mulkiyadda iyo meelaha ay khusayso

Degmada Trondheim ayaa iska leh ama u kireysa goobaha xannaanooyinka carruuraha ee degmada, degmada ayaana gacanta ku haysa oo mas’uul ka ah.

2. Hadaf

Xannaanooyinka carruuraha waxaa lagu maammulaa si waafaqsan § 1 ee Sharciga xannaanooyinka carruuraha (hadaf), iyo go’aammada iyo qorshaha ay degmadu ugu talo gashay xannaanadaas carruurta.

Xannaanooyinka carruuruhu waxay raacaan qodobbada sharciga xannaanooyinka carruuraha iyo xeerarka iyo tilmaamaha ay samaysay Wasaaradda aqoonta.

Carruurta deggan Trondheim waa in mid waliba boos ka helo hal xannaano carruureed.

3. Xaqa loo leeyahay in boos la helo

Carruurta booska xaqa u leh marka la eego sharciga xannaanooyinka carruuraha § 12 a

Carruurta hal sano buuxiya ugu danbayn dhammaadka bisha ogoosto ee sanadka la codsanayo booska xannaanada carruurta, laga billaabo bisha ogoosto ayay boos xannaano carruur xaq u leeyihiin. Carruurta hal sano buuxiya bilaha sibtembar , oktoobar iyo nofeembaree sanadka la codsanayo xannaanada carruurta, waxay boos xannaano carruur xaq u leeyihiin laga billaabo bisha ay hal sano buuxiyaan.
Degmada Trondheim waxay qaadashada guud ee 2019-ka boos xannaano carruur ku siin doontaa carruurta hal sano buuxinaya ilaa iyo dhammaadka bisha nofeembar ee 2018-ka..

4. Qaadasho (aqbilaad)

Qaybta maaddada ee korriinka iyo waxbarashada ayaa carruurta qaadata oo bixisa boosaska xannaanooyinka carruurta iyaga oo raacaya shuruudaha wax lagu qaato ee la go’aamiyay. Qodobbada qaadashada ee degmada ayaa sheegaya sida mudnaanta loo kala leeyahay marka carruur la qaadanayo iyada oo la eegayo qaybta iyo goobta la doonayo.

Degmada Trondheim waxay bixisaa boos maalin buuxda oo keliya. Wakhti yar haddii xannaanada carruurta la joogayo waxay noqonaysaa in la yareeyo inta maalin ee toddobaadkii xannaanada carruurta la joogayo.

Degaanka qaadashada: Carruurta deggan degmada Trondheim. Qofku wuu codsan karaa xannaano carruur meel kasta oo uu degmada ka deggan yahay. Si loo billaabo xannaano carruur oo degmo waa in ay qoysku degmada deggan yihiin marka uu ilmuhu xannaanada carruurta billaabayo.

Carruurta ka soo jeedda afka iyo dhaqanka saamaha

Qaybta saamaha ee xannaanooyinka carruuraha ee Ferista friluftsbarnehager ayaa boos siiya carruurta ka soo jeedda afka iyo dhaqanka saamaha.

Carruurta qaxootiga dhawaan la dejiyay

Qaybta Tellus ee xannaanada carruurta ee Øya ayaa boos siisa carruurta qaxootiga dhawaan degmada Trondheim la dejiyay. Carruurta hal sano kaddib ayaa loo beddelaa xannaanooyin kale. Beddelaadda carruurta laga beddelayo qaybta Tellus waxay dhacdaa qaadashada caadiga ah horteed.

Carruurta u baahan bey'adda luuqadda dhegoolayaasha

Carruurta adeegsada luuqadda dhegoolayaasha waxay degmadu ugu deeqdaa xannaanada carruurta ee Kolstad. Deeqdaas waxaa loo xejiyaa carruurta adeegsata af dhegoolayaasha taas oo ka timi dhibaato maqal oo haysta iyaga, waalidka ama walaalahood. Haddii meelo ka banaanyihiin waxaa boosas loo fidiyaa carruurta kale ee ku nool degmooyinka kale, waxaase shardi ah in heshiis lala galay degmadaas ay ka yimaaddan inay degmada Trondheim u celiyaan kharashkii kaga baxay boosaskaa. Carruurta degmooyinka kale ku nool waxaa la siiyaa boos buuxa ama mid nus ah.

4.1 Qaadashada guud

Qaadashada guud waxay khusaysaa carruurta xaqa sharciyanka ah u leh boos xannaano carruur (eeg qodobka 3.1) ee aan haysan boos xannaano carruur qaadashada caadiga ah ka hor. Wakhtiga kama dambaysta ah ee codsigu waa 1-da maarso.

Shuruudaha guud ee mudnaan siinta qaadashada xannaanooyinka carruurta ee degmada iyo kuwa aanay degmadu lahayn.

1. Carruurta qaba nooc naafanimo ah iyo carruurta laga gaaray go'aan waafaqsan sharciga adeegga maadinta carruurta §§ 4-2 iyo 4-4, xubinta labaad iyo xubinta afraad, eeg sharciga xannaanada carruurta § 13.

Marka ay jiraan dhawr carruur ah oo mudnaan leh, Qaybta maaddada ee korriinka iyo waxbarashadu si gooni ah ayay qof walba u qiimayn doontaa.

Dalabka caddaymaha: Lifaaqa Adeegga qoyska- iyo carruurta iyo/ama isbataal

Shuruudaha dheeriga ah mudnaan siinta ee qaadashada xannaanooyinka carruurta ee degmada

2. Walaalaha carruurta dhigta isla qaybtaas

Wax caddayn ah loogama baahna, laakiin walaaluhu waa in ay isku cinwaan uga jiraan diiwaanka dadweynaha.

3. Carruurta deggan aagga ay xannaanada carruurtu qaadato

4. Qorituur (lambarka ugu yar ayaa qorituurka ku guuleysanaya).

4.2 Qaadasho beddelaad ah

Qaadashada beddelaadda ah waxay khusaysaa carruurta booska xannaanada carruurta ka haysta Trondheim, ee boos ka codsanaya xannaano carruur oo kale ama qayb kale. Wakhtiga

codsiga ee kama danbaysta ah waa 1-da febraayo. Boosaska waxaa la qaybinayaa laga billaabo ogoosto.

Codsiga u guuridda xannaanada carruurta ee isla qaybta dhexdeeda, waxaa loo dirayaa madaxa qaybta.

Shuruudaha guud ee mudnaan siinta qaadashada xannaanooyinka carruurta ee degmada iyo kuwa aanay degmadu lahayn.

1. Carruurta qaba nooc naafanimo ah iyo carruurta laga gaaray go'aan waafaqsan sharciga adeegga maadinta carruurta §§ 4-2 iyo 4-4, xubinta labaad iyo xubinta afraad, eeg sharciga xannaanada carruurta § 13.

Marka ay jiraan dhawr carruur ah oo mudnaan leh, Qaybta maaddada ee korriinka iyo waxbarashadu si gooni ah ayay qof walba u qiimayn doontaa.

Dalabka caddaymaha: Lifaaqa Adeegga qoyska- iyo carruurta iyo/ama isbataal.

Shuruudaha dheeriga ah mudnaan siinta ee qaadashada xannaanooyinka carruurta ee degmada

2. Carruurta boos ka haysta xannaano carruur oo qoys mudnaan gaar ah ayaa la siiyaa haddii la codsado in loo beddelo xannaano carruur oo caadi ah. Waxaa shardi ah in uu ilmuhu saddex sano buuxshay ama uu saddex sano buuxinayo sanadka gudihiisa.

3. Walaalaha carruurta dhigta isla qaybtaas

Wax caddayn ah loogama baahna, laakiin walaaluhu waa in ay isku ciwaan uga jiraan diiwaanka dadweynaha.

4. Carruurta deggan aagga ay xannaanada carruurtu qaadato oo boos ka haysta xannaano carruur oo aaggaan ka baxsan.

5. Carruurta deggan aagga ay xannaanada carruurtu qaadato oo boos ka haysta xannaano carruur oo aaggaan ah.

6. Qorituur (lambarka ugu yar ayaa qorituurka ku guuleysanaya).

4.3 Qaadasho dheeri ah

Si joogto ah ayaa carruurta loo qaataa marka ay boosas bannaanaadaan sanadka gudihiisa. Qaadashadani waxay khusaysaa carruurta haysata boos xannaano carruur iyo kuwa aan haysan-ba ee soo codsada wax ka baxsan wakhtiyada kama danbaysta ee dad qaadashada ama qaadashada beddelaadda ah.

Shuruudaha guud ee mudnaan siinta qaadashada xannaanooyinka carruurta ee degmada iyo kuwa aanay degmadu lahayn.

1. Carruurta qaba nooc naafanimo ah iyo carruurta laga gaaray go'aan waafaqsan sharciga adeegga maadinta carruurta §§ 4-2 iyo 4-4, xubinta labaad iyo xubinta afraad, eeg sharciga xannaanada carruurta § 13.

Marka ay jiraan dhawr carruur ah oo mudnaan leh, Qaybta maaddada ee korriinka iyo waxbarashadu si gooni ah ayay qof walba u qiimayn doontaa.

Dalabka caddaymaha: Lifaaqa Adeegga qoyska- iyo carruurta iyo/ama isbataal.

2. Carruurta sanadka xannaanada carruurta gudihiisa lumiya booskooda, taas oo ay sabab u tahay xannaanadii carruurta oo la xiray ama fasax laga aaday. Carruurta waaya booskooda xannaanada carruurta kaddib marka ayada oo horay loo sii qorsheeyay xannaanadii carruurta la xiro ama fasax laga aaday dartii loo xiro dhammaadka sanadka xannaanada carruurta, waxaa boos lagu siinayaa qaadashada guud/qaadashada beddelaadda.

Shuruudaha dheeriga ah mudnaan siinta ee qaadashada xannaanooyinka carruurta ee degmada

3. Carruurta ka yimid qoysas uu culays badan oo xagga caafimaadka ama mid xaalado kale ay keeneen ah haysto.

Dalabka caddaymaha: Lifaaq ka yimid dhakhtar, isbataal ama Adeegga qoyska- iyo carruurta.

4. Walaalaha carruurta dhigta isla qaybtaas.
Wax caddayn ah loogama baahna, laakiin walaaluhu waa in ay isku ciwaan uga jiraan diiwaanka dadweynaha.

5. Carruurta deggan aagga ay xannaanada carruurtu qaadato ee aan boos haysan ama boos ka haysta xannaano carruur oo aaggaan ka baxsan.

6. Carruurta deggan aagga ay xannaanada carruurtu qaadato ee boos ka haysta aaggaan.

7. Ilmaha carruurta ugu weyn.

5. Lacagbixinta waalidka

Golaha shacabka ayaa sanad walba go'aamiya qiimaha ugu badan ee bishii iyo sanadkii ee halkii boos ee xannaanada carruurta. Qiimuhu wuxuu khuseeyaa boos buuxa oo caadi ah. Miisaaniyadda sanadka ayuu guddiga golaha degaanku ku dejiyaa heerka lacagta ah ee ay waalidku bixinayaan iyo xeerarka qiimadhinka iyo boosaska bilaashka ah.

Qiimaha ugu badan waxaa loo qaybiyaa kow iyo toban bilood, bisha luuliyana lacag lama bixiyo.

Lacagta cuntaduna dheeri ayay ku tahay. Qiimaha cuntada waxaa goynaya madaxa qaybta isaga oo kaashanaya guddiga isticmaalaasha xannaanada carruurta.

5.1 Qiimadhinka walaalaha

Qiimahadhinka walaalaha waa boqolkiiba 30 ilmaha labaad laga billaabo ilmaha saddexaadna waa boqolkiiba 50. Qiimadhinka walaalaha waxaa kale oo la baxshaa marka ay walaaluhu dhigtaan xannaanooyin carruur oo kala duwan. Qiimaha waxaa laga dhimaa booska ugu qiima jaban. Qiimadhinka walaalaha waxaa loo sameeyaa walaalaha isku meel si rasmi ah ugu wada

nool. Carruurta waxaa loo arkaa in ay si rasmi ah u deggan yihiin ciwaanka ay uga jiraan diiwaanka dadweynaha.

Haddii ay waalidku ku heshiiyeen in ay kala qaybsadaan meesha uu ilmuhu degganaanayo, waxaa markaa ilmaha loo arkayaa in uu labada meeloodba si rasmi ah u deggan yahay oo uu labada waalidba la deggan yahay. Waa in la keenaa codsi uu la socdo caddaynta heshiiska wada joogista (ugu yaraan boqolkiiba 40).

5.2 Lacagta ay waalidku bixinayaan oo la yaraynayo sababo dhaqaale iyo wakhti bilaash ah dartood

Degmada Trondheim waxay codsiyada yaraynta lacagta ay waalidku bixinayaan ka baaraandegtaa iyada oo la raacayo xeerarka dalka u yaalla marka la eego lacagta ay waalidku bixinayaan ee ku salaysan dakhliga.

Waxaa ilmaha xannaanada carruurta loo codsan karaa in lacagta laga yareeyo marka dakhliga guud ee qoysku uu ka hooseeyo caddadka dalka oo dhan la go'aamiyay.

Carruurta jira 3-5 sano waxaa sidoo kale loo codsan karaa 20 saac oo bilaash ah oo xannaanada carruurta la joogayo marka uu ilmuhu ku nool yahay guri uu dakhliga qoyska soo galo hooseeyo, oo uu ka hooseeyo caddad dalka oo dhan la go'aamiyay. Marka la codsado in la yareeyo lacagta ay waalidku bixinayaan wuxuu sidoo kale codsigu khusayn doonaa wakhtiga saacadaha bilaashka ah.

Lama yaraynayo lacagta ay waalidku bixiyaan ee wakhti la soo dhaafay, laakiin waxaa laga billaabayaa bisha koowaad ee buuxda kaddib marka ay degmada Trondheim hesho codsi ay caddaymo la socdaan.

5.3 **Lacagta ay waalidku bixinayaan oo la yaraynayo haddii ay dhacdo xirid aan caadi ahayn**

Haddii ay dhacdo in xannaanada carruurta xirid aan caadi ahayn la xiro, waxaa waalidka loo celin karaa lacagtii ay ku bixiyeen maalmaha ay xannaanada carruurtu xiran tahay.